


Dugsiyada Dadweynaha Buffalo

Heerarka Anshaxa Bulshada Weynta Guud iyo Taageerada Waxqabadyada

2022-2025

Xeerka Anshaxa Ardayga



Dr. Tonja M. Williams

Kormeeraha Guud ee Dugsiyada

www.buffaloschools.org

Waa maxay sababta aan u leenahay Xeerka Anshaxa?

Ujeedada Xeerka Anshaxu waa in la dejiyo rajooyin cad oo laga filayo hab-dhaqanka kor u qaadaya badbaadada iyo nidaamka hantida dugsiga. Tani waa lagama maarmaan si ardaydu u helaan jawi waxbarasho oo ugu wanaagsan ee suurtoogalka ah.

Ixtiraamka, akhlaaqda wanaagsan iyo daryeelka dadka kale, oo ay weheliso is-edbinta iyo ixtiraamka saxda ah ee maamulka ayaa loo baahan yahay si dugsiyada loogu dhigo bulshooyin waxbarasho oo daryeel leh.

Door nooc ah ayay ardaydu ku leeyihiin caawinta xoojinta Xeerka Anshaxa?

Ardaydu waxay door muhiim ah ka ciyaaraan ilaalinta nabadgelyada iyo nidaamka dugsiga iyo dhaqan gelinta Xeerka Anshaxa. Dugsigu waa goobtaada waxbarasho, waxaana loo baahan yahay caawimadaada si goobtu u sii ahaagto meel ammaan ah oo wax soo saar leh.

Ardayda waxaa laga filayaa inay si degdeg ah ugu wargeliyaan jebinta Xeerka Anshaxa Macalinka, maamulaha, ama xubin kale oo shaqaalaha dugsiga ah. Tan waxa ku jira ardayda arka kuwo kale oo hub haysta, aalkolo, ama walxaha sharci darrada ah dugsiga iyo nawaaxiga la xiriira (ay ku jiraan basaska dugsiga) ama hawlaha dugsiga la xiriira.

Waa maxay waxyaabaha laga filayo ardayda?

Dhammaan ardayda waxaa laga filayaa inay u dhaqmaan si habboon oo asluub leh, iyadoo la tixgelinayo badbaadada iyo daryeelka kuwa kale. Sida uu qabo Xeerka Anshaxa, arday ahaan waxaa lagaa filayaa inaad:

- U shaqeysid sida ugu fiican ee kartidaada oo ku dadaal heerarka ugu sarreeya ee hanashada guusha.
- Tagto dugsiga maalin kasta, oo joog fasalka wakhtiga loogu talagalay oo u diyaargarow inaad wax barato.

- Raac shuruucda anshaxa ardayga ee ku habboon, oo ay ku jiraan xeerka labiska ardayga iyo xeerka isticmaalka elegtarooniga.
- Caawinaad ka raadso shaqaalaha dugsiga si ay u xaliyaan mashaakilka horseedi kara tallaabo Anshaxeed (la taliyaha dugsiga, shaqaalaha bulshada, ‘Shaqaalaha ‘Say Yes’).
- Ula dhaqan macalimiinta, maamulayaasha, shaqaalaha kale ee dugsiga, iyo ardayda aad isku fasalka tihiin si xushmad leh, oo wanaagsan.
- Aqbal mas’uuliyadda falkaaga.
- U soo sheeg saraakiisha dugsiga wixii macluumaad ah ee caawin kara ka hortagga khatarta ama dhaawaca dadka kale.
- Gacan ka gayso jawi dugsi oo ammaan ah oo nidaamsan oo ixtiraam u muuji dadka kale.
- Dhammaystir dhammaan shaqada fasalka sidii loogu talagalay
- Dhagayso codsiyada maamyulayaasha, shaqaalaha, iyo macalimiinta dugsiga.
- Ixtiraam hanatida dugsiga.
- Isticmaal erayo/luuqad ku habboon.

Waxa la sameeyo ka hor inta uusan dhicin jebinta

Xeerka Anshaxa:

- La hadal macalinkaaga
- Weydiiso inaad aado Xafiiska Kooxda Taageerada Ardayga (SST)
- Tiri ilaa 10
- Neef qoto dheer qaado
- Caawin weydiiso xubin shaqaalaha dugsiga ah
- La samee Macalinkaaga qorshe kaa caawin doona marka ay dhibaato timaado.
- U diyaargarow fasalka
- Waqtiga dhowr oo diyaar u noqo inaad fasalka ka shaqeyso
- Joog goobta lagu xilsaaray mar walba
- La hadalk waalidkaa, awoowayaasha, ama xubnaha kale ee qoyska

Waa maxay Xuquuqdayda iyo Mas'uuliyaddayda Arday ahaan?

Ardayda waxay xaq u leeyihiin:

- Inuu dhigto dugsiga degmada uu daryeelaha sharciga ah uu deggan yahay ama masuulka sharciga ah iyo inuu helo waxbarasho dadweyne oo bilaash ah oo ku habboon da'da 5 sano ilaa 21 sano jirka, sida sharcigu dhigayo.
- Filo in dugsigu noqdo meel ammaan ah, nidaamsan, oo ujeedo leh dhammaan ardayda si ay wax u bartaan oo loola dhaqmo si caddaalad ah.
- Waa meel ardayda kale iyo shaqaalaha dugsiga ku ixtiraamaan shakhsi ahaan oo kula dhaqman si xushmad, cadaalad iyo ixtiraam leh.
- U muujiyo qofka ra'yigiisa si hadal ama qoraal ah.
- U labbiso qaab muujianaya shakhsiyadda qofka.
- La bixiyo fursado waxbarasho oo loo siman yahay oo habboon.
- Uga qaybqaado dhammaan hawlaha dugsiga si siman iyadoon loo eegayn jinsiyada dhalashada, midabka, caqiidada, diinta, dhaqamada diinta, jinsiga, doorbashada nooca galmoodka, lab iyo dhedig, asal qaran, koox qowmiyadeed, xiriir siyaasadeed, da'da, xaalad guur, ama naafo.
- Helitaanka macluumaad hadaf leh oo la xiriira ku xad-gudubka maandooriyaha iyo khamriga, iyo sidoo kale gelitaanka shakhsiyaadka ama wakaaladaha awooda inay si toos ah u caawiyaan ardayda leh dhibaatooyinka shakhsi ahaaneed ee aad u daran.

- In laga ilaaliyo caga-jugleynta, handadaad, ama takoorid ku salaysan isir dhab ah ama loo dareemayo isir ahaan, midab, miisaanka jirka, asal qaran, koox, diin, ama dhaqan diineed, jinsi, aqoonsiga lab iyo dhedig, nooca galmada, ama naafanimada, shaqaalaha ama ardayda hantida nawaaxiga dugsiga ama dhacdo, shaqo ama hawl dugsigu kafaalo qaaday, shaqo, ama hawl.

Ardeyda waxaa mas'uuliyadda ka saran inay:

1. Inay xaadiraan dugsiga maalin kasta, si joogto ah iyo wakhtigeeda, u gutaan waajibaadyada, ku dadaalaan inay qabtaan shaqada ugu tayada sareysa ee suurtoogalka ah, u diyaargarowan waxbarasho, iyo in la siiyo fursad ay ku helaan waxbarasho wanaagsan.
2. Inaad ka warqabaan dhammaan sharciyada iyo waxyaabaha laga filayo ee xakameynaya anshaxa ardayga oo ay u dhaqmaan si waafaqsan tilmaamaha
3. In la ixtiraamo qof kasta oo ka tirsan bulshada dugsiga iyo in loola dhaqmo sida dadka kale ay raban in loola dhaqmo
4. In si xushmad leh ay u cabiraan ra'yiga iyo afkaarta si aan loo xumayn, loo xaman, ama looga xaddidin xuquuqda iyo mudnaanta dadka kale.
5. In aad u labistaan si ku habboon si waafaqsan xeerka lebbiska, si aanay khatar u gelin caafimaadka jirka, badbaadada, u xaddidin ka qaybgalka hawlaha dugsiga ama si aan macquul ahayn u carqaladeyaan.

6. To be aware of available educational programs in order to use and develop one's capabilities to their maximum
Inaad ka warqabto barnaamijyada waxbarasho ee la heli karo si loo isticmaalo loona horumariyo kartida qofka
7. Inay ka shaqeeyo sida ugu wanaagsan ee qofku u awoodo dhammaan hawlaha tacliinta iyo manhajka ka baxsan, iyo sidoo kale inuu ahaado mid caddaalad sameeya oo taageera dadka kale
8. Inaad ka warqaban macluumaadka iyo adeegyada oo ay raadsadan caawimo wax ka qabashada dhibaatooyinka shakhsi ahaaneed, marka ay habboon tahay
9. In la is ixtiraamo oo dadka kale loola dhaqmo si cadaalad ah si waafaqsan Xeerka Anshaxa Degmada iyo Qodobada Xeerka Sharafta.
10. In ay u dhaqmaan qaab kobcinaya deegaan aan lahayn cagajugleyn, dhibaatayn, ama takoorid.
11. Inaad wargeliso oo aad dhiirigeliso kuwa kale, inaad ka warbixiso dhacdo kasta oo cagajugleyn, dhibaatayn, ama takoorid ah.

Waa maxay xeerka labiska ee ay tahay in aan raaco?

Markaad joogtid hantida dugsiga ama goob hawlaha dusiga ah, xeerka labiska ayaa aad muhiim u ah. Markaad isu diyaarinayso inaad dugsiga aado ogow inaad si habboon u labisato si aanay u carqaladayn ama faragelin ugu sameyn nidaamka waxbarashada, iyo inaad ixtiraamto jawiga waxbarashada ee xirfadda leh. Tusaale ahaan:

- Lama oggola dhar jirka lagu dhex arkayo, aad kugu dhegan, ama si xad dhaaf ah u gaaban (oo ay ku jiraan dhammaan surwaalada, goonnada, surwaal daba gaabka, iyo shaararka).
- Ku dabool dhammaan dharka hoos lagu xirto dharka dusha sare ee ku habboon, oo ay ku jiraan xirashada surwaalka ilaa dhexda.
- Xiro kabo ammaan ah oo ku habboon. Kabaha aan habboonayn waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn, kabo aan suunka dambe aan lahayn (sida, dacaska, sandalka qolka jiifka). Tixgelinta Ka-dhaaftaanka waxa kaliya oo lagu dabaqi doonaa xaaladaha caafimaad ee la diiwaangeliyay.
- Kaliya xiro dharka madaxa oo looga baahan yahay sababo caafimaad ama diimeed.
- Lama ogola dhar xun oo qaawan, anshax xumo, fisqi ah, iyo aflagaado ama ceebayn dadka kale, ama u keenaya carqalad dugsiga ama caqabad ku ah barnaamijka waxbarashada.
- Lama ogola dhar kor u qaada iyo/ama taageera isticmaalka aalkolada, tubaakada, ama daroogooyinka kale ee sharci darrada ah iyo/ama dhiirigeliya hawlaha kale ee sharci darrada ah ama rabshadaha.
- Funaanadaha koofiyadaha madaxa leh (ama "hoodies") waa la gashan karaa, laakiin koofiyadaha waa inay had iyo jeer laga qaada madaxa marka lagu jiro gudaha dhismayaasha.
- Ha xiran Majowharaat/Dahab loo qaadan karo hub. Suunka waa in la xidhaa
- Ha xiran dhar lala xiriirinaayo ama lagu aqoonsan karo calaamad xubinnimada gaangiska.

*****Xusuusin--Ardayda ku xad-gudubta xeerka labiska waxa looga baahan yahay inay wax ka beddelaan muuqaalkooda iyagoo daboolaya ama ka saaraya shayga gafka ah, iyo haddii loo baahdo iyo/ama dhab ahaan ku beddela shay la aqbali karo. Arday kasta oo diida inuu sidaas yeelo waxa laga yaabaa in lagu xukummo edbin sida waafaqsan Heerarkan Anshaxa iyo Taageerada Faragelinta ee Bulsho Weynta Guud. Ku xadgudubka xeerka labiska waa in aanu u horseedin kala duwanaanshiyaha fursadaha waxbarasho ee jinsiga.**

Waa maxay sharciyada ku saabsan isticmaalka

Aaladaha Elektarooniga ah?

Marka taleefanka gacanta lagala wareego arday, shaqaaluhu waxay isla markaaba ogeysiin doonaan waalidka(iinta)/masuulka(iinta) ardayga si loo habeeyo qaab kale oo (xiriir isgaarsiin ah) loola sameeyo ilmahooda. Qodobbada la wareegidda ee Xeerkan Anshaxa ee Dugsiyada Dadweynaha Buffalo waxay shaqaalaha uga baahan yihiin inay si degdeg ah ula xiriiraan waalidiinta/mas'uuliyiinta.

- Go'aanka ah in la keeno qalab isgaarsiin elektaroonig ah oo shakhsi ah (sida Taleefanka gacanta, iPod-yada, iPad-yada, Laabtoobyada, Tabletyada, iwm.) ama aaladaha ciyaarta elektarooniga ah (X-Box, PlayStation, iwm) waa go'aanka ardayga iyo/ama waalidka/masuulka ardayga.
- Ardayda, waalidiinta, iyo dadka ardayda masuulka ka ah waa in ay ogaadaan in degmadu aanay masuul ka noqon doonin wixii waxyeelo ah, burburin, xatooyo, ama waayida agabka noocaas ah ee dugsiyada ka dhacda.
- Marka la soo galo dugsiyada dhammaan taleefannada gacanta waa in lagu kaydiyaa sanduuqa ardayga. Taleefanka gacanta waa in la kaydiyaa "ISAGOO DANSAN" ama qaab aan shaqaynayn.

- Ardaydu ma qaadan karaan ama kuma isticmaali karaan taleefannada gacanta dhismayaasha dugsiga iyo basaska dugsiga.
- Ardey kasta oo sita ama ku dhex shaqeysiya taleefoonka gacanta ee dhismaha dugsiga waxaa kala wareegi doona shaygaas Maamulka Degmada ama Shaqaalaha Badbaadada/Ammaanka.
- Marka qalabkan lagala wareego aalada dhismaha dugsiga, Waalidka/Masuulka waa inuu la kulmo maamulaha dhismaha si ay u soo ceshadaan shayga.
- Haddii arday lagu helo ku xad-gudub soo noq-noqda xeerkan, aaladda waa lagala wareegayaa oo waxaa la geynayaa Xafiiska Badbaadada/Ammaanka Degmada. Waalidka/Masuulka waa inay sameeyaan qabanqaabada soo qaadista shayga. Ardayda waxaa laga yaabaa in lagu soo rogo anshax waafaqsan Xeerka Anshaxa Dugsiyada Dadweynaha Buffalo.
- Qaadista, faafinta, wareejinta, ama wadaagida muuqaalada fisqiga ah, dadka qaaqaawan, ama kuwa kale ee sawirada sharci darrada ah ama sawiraanta, ha ahaato wareejinta xogta qaab elektaroonigga ah (qalabka isgaarsiinta wirelesska) ama haddii kale (sida badan loo yaqaan qoraalka, qoraalka galmada, iimayl diris, iwm.) ayaa noqon kara DEMBIGA hoos yimaada sharciga Gobolka iyo/ama kan Federaalka. Qof kasta oo sawir qaada, faafiya, beddela, ama wadaaga fisqiga, dadka qaaqaawan, ama muqaal sawir ama sawirada kale ee sharci-darrada ah waxa la marsiin doonaa nidaamka anshax-marinta ee dugsiga degmada waxaana loo gudbin doonaa sharci fulinta iyo/ama hay'adaha kale ee gobolka iyo federaalka ee ku habboon taasoo keeni karta xarig, dacwad oogis, iyo ka mid ahaanshaha diiwaanka dembiilayaasha galmada oo WAQTIGA NOLOSHA AH.
- Booliska, Saraakiisha Sharci Xoojinta ee Hay'adda Dawladda, Badbaadada/Amniga Dugsiga iyo Shaqaalaha Maamulka Dugsiga waxay haystaan oggolaansho ay ku haystaan oo ay ku adeegsadaan qalabka isgaarsiinta si loogu dhaqmo qaabka hawlaha ku habboon.

*****Xusuusin-- Degmadu waxay oggolaan kartaa isticmaalka habboon ee taleefanka gacanta fasalka dhexdiisa marka loo isticmaalo ujeedooyin waxbarasho oo KELIYA.**

Amarka oggolaanshaha isticmaalka aaladaha elegtarooniga ah waxa kaliya bixin doona maamulaha dugsiga.

Heerarka Faragelinta Waxqabadka iyo Jawaab Celinta

Marka ardaydu jabiyaan habdhaqanka laga filaayo ee lagu qeexay Xeerka Anshaxa Dugsiyada Dadweynaha Buffalo, shaqaalaha iyo maamulayaasha dugsiga waxay uga jawaabaan si macquul ah oo joogto ah ee ku haboon.

Waxaa ku jira Xeerka Anshaxa 4 heerar oo ah jawaab celinta suurtagalka ah ee xadgudubyada Xeerka Anshaxa. Xadgudub kasta waxaa loo qoondeeyay mid ka mid ah heerarkan faragelinta iyo jawaab celinta. Maamulayaasha iyo shaqaalaha dugsigu waa inay isticmaalaan **kaliya heerarka lagu soo jeediyay** habdhaqan kasta.

Haddii dabecadda aan habboonayn ama qaska loo qoondeeyay laba heer ama ka badan, markaa, meel kasta oo suurtagal ah, heerka ugu hooseeya ee wax ka qabashada iyo jawaab-celinta edbinta waa in marka hore la isticmaalo.

Tusaale ahaan, haddii ardaygu diido inuu raaco tilmaamaha, shaqaalaha dugsigu iyo maamulayaashu waa inay marka hore isticmaalaan xeeladaha faragelinta iyo jawaabaha Heerka 1aad ka hor intaysan u gudbin Heerka 2aad.

Marka maamulayaasha iyo shaqaalaha dugsigu ay ka jawaabaan habdhaqanka ardayga, waxa laga filayaa inay tixgeliyaan arrimo badan. Bogagga soo socdaa waxay bixinayaan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Faragelinta waxqabadyada iyo Heerarka jawaabta.

DABEECADAHA AAN HABBOONAYN IYO QALQAL GELINTA IYO HEERARKA JAWAAB CELINTA

FURAHA: ISTICMAAL HEERKA UGU HOOSEEYA EE LA TILMAAMAY MARKA HORE

Heerka 1. Taageerada Fasalka iyo Kooxda Taageerada Ardayga: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka ardaygu aanu lahayn shilal hore iyo faragelin waxqabad aan loo meel dhigin	Heerka 2. Maamulka Haboon: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka taageerooyinka loo meel dhigo fasalka si wax looga qabto hab-dhaqanka, laakiin hab-dhaqanku uu sii socdo oo si xun u saameeyo waxbarashada ardayda iyo dadka kale	Heerka 3. Ka joojinta Muddada Gaaban: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka wax-ka-qabashada iyo taageerada meel loo dhigo laakiin hab-dhaqanka soo noqnoqda oo kor u sii socdo	Heerka 4. Codsiga Joojinta Muddada Dheer: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka dhaqanka ardaygu si dhab ah u saameeyo badbaadada dadka kale ee dugsiga		
DABEECAD AAN HABBOONAYN OO QALQAL LEH	HEERKA 1	HEERKA 2	HEERKA 3	HEERKA 4	WAXA LAGA YAABAA IN LOO GUDBIYO BILAYSKA/HAY'ADDA KU HABBOON
#1. MAQNAANSHAHA					
● Maqnansho Dugsi bilaa cudur daar ah	●				
● Ka Maqnansho joogta ah ama xad dhaaf ah	●	●			
● Caadaysashada maqnanshaha (sida, si sharci darro ah dugsiga uga maqnaado dhowr maalmood in ka badan 20 boqolkiiba xilliga calaamadaynta, rubuca ama sannad kasta)	●	●			
#2. DAACAD LA'AANTA WAXBARASHADA					
● Khiyaanada ama Been abuurka (PreK-8)	●	●			
● Khiyaanada ama Been abuurka (9-12)	●	●	●		
#3. KHAMRIGA					
● Saameynta sakhraansananta		●	●	●	●
● Isticmaalka ama haysashada		●	●	●	●
● libinta ama qaybinta				●	●
#4. ARDAYGA LA WEERARO (ay ku jirto garaacid, laad, ama feer arday kale u gaysta diginin ama daandaansi la'aan)					
● Wax dhaawac ah ma jiro (ma jiro dhaawac muuqda, oo ay ku jiraan dhacdada rabshadaha qoyska/ khilaafyada xiriirka)		●	●		
● Dhaawac jirka ah Pre-K ilaa fasalka 4aad		●	●	●	
● Dhaawac jirka ah fasalada 5 ilaa 12			●	●	●
#5. KHATARTA BAMKA					
● Fasalada PreK ilaa 4aad		●	●	●	●
● Fasalada 5 ilaa 12				●	●
#6. U CAGAJUGLAYNTA (ay ku jiraan cagajuglaynta interneedka iyo dhacdooyinka gaaangiska la xiriira)					
● Fal ula kac ah (ay ku jiraan si afka, jirka and qoraal ah loo geysto) ama isgaarsiinta elegtaroniga ah oo hanjabaad ama si dhab ah u cabsi gelinaya oo si weyn u carqaladeeya habsami u socodka dugsiga	●	●	●		
● Xoog u sheegashada halista ah (sida ku celcelinta waqti ka dib ku lug lahanshaha dhaqamo xun xun oo ula kac ah oo si xun u saameeya awooda arday kale ka qaybqadashada dugsiga ama barnaamijyada manbhajka ka baxsan)		●	●	●	●

DABEECADAHA AAN HABBOONAYN IYO QALQAL GELINTA IYO HEERARKA JAWAAB CELINTA

KEY: USE LOWEST LEVEL INDICATED FIRST

Heerka 1. Taageerada Fasalka iyo Kooxda Taageerada Ardayga: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka ardaygu aanu lahayn shilal hore iyo faragelin waxqabad aan loo meel dhigin	Heerka 2. Maamulka Haboon: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka taageerooyinka loo meel dhigo fasalka si wax looga qabto hab-dhaqanka, laakiin hab-dhaqanku uu sii socdo oo si xun u saameeyo waxbarashada ardayda iyo dadka kale	Heerka 3. Ka joojinta Muddada Gaaban: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka wax-ka-qabashada iyo taageerada meel loo dhigo laakiin hab-dhaqanka soo noqnoqda oo kor u sii socdo	Heerka 4. Codsiga Joojinta Muddada Dheer: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka dhaqanka ardaygu si dhab ah u saameeyo badbaadada dadka kale ee dugsiga		
DABEECAD AAN HABBOONAYN OO QALQAL LEH	HEERKA 1	HEERKA 2	HEERKA 3	HEERKA 4	WAXA LAGA YAABAA IN LOO GUDBIYO BILAYSKA/HAY'ADDA KU HABBOON
#7. BUS VIOLATION XAD-GUDUBYADA BASKA					
● Khalkahl yar oo baska dhexdiisa ah (ay ku jiraan wax cunid, cabbid, qaylo badan, istaagid),	●	●			
● Khalkhal daran oo baska ku yimi (oo ay ku jiraan dagaal, walxo tuurid, mashquulin darawalka baska, furista meelaha degdega)		●	●	●	●
#8. GOYNATA FASALKA					
● Imansha la'ann soo noqnoqta fasalka la qorsheeyay	●	●			
#9. KHALKHAL GELINTA FASALKA					
● Inaad fasalka dhexdiisa ku hadasho ama mar aan xaq u lahayn hadasho; walxo tuurid; beegsasho shaqsi; dhibid ama ku jeesjeesid ardayda kale; iyo dabeecadaha kale carqaladeya waxbarashada ardayga	●	●			
#10. KA MADAX ADAYGA MAAMULKA IYO/AMA AMAR DIIDADA					
● Ku guuldareysiga in la raaco tilmaamaha	●	●			
● Ku guuldareysiga inaad raacdo ka jawaabista su'aalaha ama codsiyada shaqaalaha dugsiga	●	●			
● Ku guuldareysiga inaad raacdo tilmaamaha u horseedaya khatar ama waxyeelo u gaysan kara naftisa ama qof kale	●	●	●		
Ku guuldareysiga in aad raacdo tilmaamaha sida tooska ah u horseedaya waxyeelada naftaada ama dadka kale					

DABEECADAHA AAN HABBOONAYN IYO QALQAL GELINTA IYO HEERARKA JAWAAB CELINTA

KEY: USE LOWEST LEVEL INDICATED FIRST

Heerka 1. Taageerada Fasalka iyo Kooxda Taageerada Ardayga: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka ardaygu aanu lahayn shilal hore iyo faragelin waxqabad aan loo meel dhigin	Heerka 2. Maamulka Haboon: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka taageerooyinka loo meel dhigo fasalka si wax looga qabto hab-dhaqanka, laakiin hab-dhaqanku uu sii socdo oo si xun u saameeyo waxbarashada ardayda iyo dadka kale	Heerka 3. Ka joojinta Muddada Gaaban: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka wax-ka-qabashada iyo taageerada meel loo dhigo laakiin hab-dhaqanka soo noqnoqda oo kor u sii socdo	Heerka 4. Codsiga Joojinta Muddada Dheer: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka dhaqanka ardaygu si dhab ah u saameeyo badbaadada dadka kale ee dugsiga		
DABEECAD AAN HABBOONAYN OO QALQAL LEH	HEERKA 1	HEERKA 2	HEERKA 3	HEERKA 4	WAXA LAGA YAABAA IN LOO GUDBIYO BILAYSKA/HAY'ADDA KU HABBOON
• Sameynta baaq dhaqdhaqaaq jirka ah, calaamado, ama faallooyin aan habboonayn, ama adeegsiga luuqad af-xumo ama aflagaado	•	•			
• Isticmaalka aflagaado ama bahdilaad, ama been u sheegid, marin habaabin, ama xog been ah oo la siiyo shaqaalaha dugsiga	•	•	•		
• sticmaalka aflagaado ama bahdilaad ama been u sheegid, marin habaabin, ama xog been ah la siiyo shaqaalaha dugsiga taasoo u horseedda dhaawac maskaxeed ama jireed qof kale.	•	•	•	•	•
#12. XEERKA LEBBISKA					
• Tixraac halbeegyada xeerka labbiska ee bogga 35-aad	•	•			
#13. MAANDORIYASHA AMA WALXAHA LA KONTOOLO (Dugsiga, hawlaha dugsigu kifaalo qaado ama marka ay lug ku yeeshaan shilalka saameeya badbaadada ama daryeelka bulshada dugsiga)					
• Jawi sarqaansan ku jira		•	•	•	•
• Isticmaalka ama haysashada		•	•	•	•
• Qaybinta ama iibinta				•	•
#14. BAXSASHO/DHUUMASHO					
• Ka bixida xayndaabka dugsiga ama dhex wareegaysiga Hoolalka dugsiga iwm, fasax la'aan eaving	•	•			
#15. BAADDA/QASBIDA (sida, qaadashada ama isku daya in laga qaado qof kale (lacag ama hanti baad ah) hanjabaad xoog, la muujiyo ama si maldahan)					
• PreK ilaa fasalka 4-aad		•	•		
• Fasalada 5-aad ilaa 12-aad			•	•	•
#16. IN LA DAARO SEERIGA DIGNIINTA DABKA OO BEEN AH					
• PreK ilaa fasalka 4-aad		•	•	•	•
• Fasalada 5-aad ilaa 12-aad		•	•	•	•
#17. DAGAALKA					
• Gardarada jireed ee arday kale (sida, jiidhid ama riixid)	•	•			
• Dagaal yar (waxaa ku jiri kara shilal sababay dhaawacyo fudud)	•	•	•		

DABEECADAHA AAN HABBOONAYN IYO QALQAL GELINTA IYO HEERARKA JAWAAB CELINTA

KEY: USE LOWEST LEVEL INDICATED FIRST

Heerka 1. Taageerada Fasalka iyo Kooxda Taageerada Ardayga: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka ardaygu aanu lahayn shilal hore iyo faragelin waxqabad aan loo meel dhigin	Heerka 2. Maamulka Haboon: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka taageerooyinka loo meel dhigo fasalka si wax looga qabto hab-dhaqanka, laakiin hab-dhaqanku uu sii socdo oo si xun u saameeyo waxbarashada ardayda iyo dadka kale	Heerka 3. Ka joojinta Muddada Gaaban: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka wax-ka-qabashada iyo taageerada meel loo dhigo laakiin hab-dhaqanka soo noqnoqda oo kor u sii socdo	Heerka 4. Codsiga Joojinta Muddada Dheer: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka dhaqanka ardaygu si dhab ah u saameeyo badbaadada dadka kale ee dugsiga
--	--	---	---

DABEECAD AAN HABBOONAYN OO	HEERKA	HEERKA	HEERKA	HEERKA	WAXA LAGA YAABAA IN LOO
----------------------------	--------	--------	--------	--------	-------------------------

#18. KICINTA DABKA/DEMBIGA DAB KICIN SI BAREER AH

● Si bareer ah oo dab loo kiciyo; burbur hantiyeed oo ka dhashay dabka la kiciyay			●	●	●
---	--	--	---	---	---

#19. QAMAARKA

● U baahan isticmaalka lacagta ama alaabo walax lagu beddelan karo	●	●	●		
--	---	---	---	--	--

#20. DHAQAN XUMADA MARINADA HOOLKA

● Orodka, buuqa xad dhaafka ah, ama joogitaan maalayacni ah	●	●			
---	---	---	--	--	--

#21. KADEEDIS KU SALAYSAN ISIRKA, QOYMIYADDA, JINSIGA, DOORBISHADA NOOCA GALMADA, NAAFANIMADA AMA DIINTA (ay ku jirto dhibaataaynta interneedka oo ka dhanka ah xubin ka tirsan bulshada dugsiga)

● Dhibaataayn yar	●	●			
-------------------	---	---	--	--	--

● Dhibaataayn culus (sida, dhibaataayn joogto ah, ama dhibaataayn wakhti dheer)		●	●	●	●
---	--	---	---	---	---

#22. DAMBIGA NACAYBKA

● Gaf Dembi ah oo ka dhanka ah qof ama hanti oo ay sabab u tahay guud ahaan ama qayb ka ahaan oo eexda dembiilaha ka dhanka xaga isirka jinsiyadda, diinta, naafanimada, asalka qowmiyadda, ama nooca galmada, oo ay ku jiraan hadalada nacaybka		●	●	●	●
--	--	---	---	---	---

#23. KICINTA AMA KA QAYB QAADASHADA QASKA

● Khalkhal weyn ku keenaya jawiga nidaamka iyo anshaxa dugsiga ee lagama maarmaanka u ah waxbarashada wax ku ool ah, khalkhalgelinta meel ka baxsan fasalka guud (maqaaxiyaha, hoolka, maktabadda, joogsiga baska, iwm.)		●	●	●	●
--	--	---	---	---	---

● Isticmaalka aaladda isgaarsineed ee gaarka ah si aad u soo jiidato dad kale si ay u abuuraan qas		●	●	●	●
--	--	---	---	---	---

DABEECADAHA AAN HABBOONAYN IYO QALQAL GELINTA IYO HEERARKA JAWAAB CELINTA

KEY: USE LOWEST LEVEL INDICATED FIRST

Heerka 1. Taageerada Fasalka iyo Kooxda Taageerada Ardayga: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka ardaygu aanu lahayn shilal hore iyo faragelin waxqabad aan loo meel dhigin	Heerka 2. Maamulka Haboon: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka taageerooyinka loo meel dhigo fasalka si wax looga qabto hab-dhaqanka, laakiin hab-dhaqanku uu sii socdo oo si xun u saameeyo waxbarashada ardayda iyo dadka kale	Heerka 3. Ka joojinta Muddada Gaaban: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka wax-ka-qabashada iyo taageerada meel loo dhigo laakiin hab-dhaqanka soo noqnoqda oo kor u sii socdo	Heerka 4. Codsiga Joojinta Muddada Dheer: 16 Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka dhaqanka ardaygu si dhab ah u saameeyo badbaadada dadka kale ee dugsiga
--	--	---	--

DABEECAD AAN HABBOONAYN OO QALQAL LEH	HEERKA 1	HEERKA 2	HEERKA 3	HEERKA 4	WAXA LAGA YAABAA IN LOO GUDBIYO BILAYSKA/HAY'ADDA KU HABBOON
--	-----------------	-----------------	-----------------	-----------------	---

#24. WALXAHA UUMIGA LA DHUUQO (INHALANTS)

<ul style="list-style-type: none"> ● Ku sarqaansan walxaha la dhuuqo – shaqaalaha caafimaadka waa in isla markiiba la ogeysiiyaa haddii arday la ogaado inuu ku sarqaansan yahay ama isticmaalaha uumiga walxaha la dhuuqo ● Isticmaalka ama haysashada ● Qaybinta ama iibinta 		●	●	●	●
---	--	---	---	---	---

#25. XIRIIR JIREED EE SHAQAALAHA DUGSIGA/QOF QAANGAAR AH OO SHAQAALAHA AAN AHAYN (ay ku jiraan booqdayaasha dugsiga, la hawlgalayaasha bulshada, bixiyayaasha adeegyada dugsiga ka hor ama ka dib)

<ul style="list-style-type: none"> ● Xiriir jireed oo aan ula kac ahayn oo lala yeesho shaqaalaha dugsiga ● Weerar ka dhan ah shaqaalaha dugsiga; weerar jir ahaaneed ee shaqaale ka tirsan Dugsiyada Dadweynaha Buffalo ama qof kale oo weyn, oo ay ku jiraan dhufashada xubin ka mid ah shaqaalaha oo soo dhexgala dagaal socda ama hawlo kale oo qas ah 	●	●			●
--	---	---	--	--	---

#26. AALADAHA ELEKTARONIGA OO LA QAADAN KARO

<ul style="list-style-type: none"> ● Isticmaalka talefannada gacanta, PDA-yada, iPod-yada, aaladaha ciyaartaelegtarooniga ah waqtiyada aan la ogolayn. Xad-gudubka koowaad, ardayda waa in la siiyo digniin keliya. Keliya ka dib xadgudubka koowaad ayaa ardaygu lagu qaadi karaa jawaabaha Heerka 1. Xad-gudubka labaad, ogeysiinta waalidku waa inay dhacdaa. Hoggaanka dugsigu ayaa hirgelin kara dhaqamo dhiirigelinaya badbaadada dugsiga: in la sameeyo nidaamyo lagaga ururin karo talefannada gacanta ardayda marka ay gelayaan dugsiyada ka dibna dib loogu celiyo ardayda dhammaadka maalin dugsiiyeedka. ● Isticmaalka aaladaha elegtarooniga ah kaas oo la go'aamiyay in isticmaalka noocaas ahi uu horseedo ama si toos ah u keeno dhaawac jireed ama shucuureed qof kale 	●	●			
---	---	---	--	--	--

DABEECADAHA AAN HABBOONAYN IYO QALQAL GELINTA IYO HEERARKA JAWAAB CELINTA

KEY: USE LOWEST LEVEL INDICATED FIRST

Heerka 1. Taageerada Fasalka iyo Kooxda Taageerada Ardayga: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka ardaygu aanu lahayn shilal hore iyo faragelin waxqabad aan loo meel dhigin	Heerka 2. Maamulka Haboon: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka taageerooyinka loo meel dhigo fasalka si wax looga qabto hab-dhaqanka, laakiin hab-dhaqanku uu sii socdo oo si xun u saameeyo waxbarashada ardayda iyo dadka kale	Heerka 3. Ka joojinta Muddada Gaaban: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka wax-ka-qabashada iyo taageerada meel loo dhigo laakiin hab-dhaqanka soo noqnoqda oo kor u sii socdo	Heerka 4. Codsiga Joojinta Muddada Dheer: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka dhaqanka ardaygu si dhab ah u saameeyo badbaadada dadka kale ee dugsiga
--	--	---	---

DABEECAD AAN HABBOONAYN OO QALQAL LEH	HEERKA	HEERKA	HEERKA	HEERKA	WAXA LAGA YAABAA IN LOO GUDBIYO BILAYSKA/HAY'ADDA KU HABBOON
	1	2	3	4	

#27. WAXYELO HANTI, OO AY KU JIRTO WAX KU SAWIRID/WAX KU XARDHID

● Waxyeelo yar ama waxyeelo shil ah, (oo ka yar \$50)	•	•			
● Waxyeelo loo geysto qof kale hantidiisa ama dugsiga		•	•	•	•

#28. ISTICMAALKA QALABKA DUGSIGA AMAR LA'AAN

● Isticmaalka kobiyuutarada, mishiinka fakiska, telefoonada iwm.	•	•			
--	---	---	--	--	--

#29. DHAAWAC CULUS OO JIRKA AH

● Keenaya khatar weyn oo dhimasho ah ama keeni kara muuqaal beddel jirka oo joogta ah ama aad u daran, luminta shaqada qayb ka mid ah jirka ama daciifnimo shaqada qayb ka mid jirka			•	•	•
--	--	--	---	---	---

#30. WEERAR XADGUDUB GALMO AMA GAF

● Falka galmada ee qasabka ah - shaqaalaha dugsiga waxa looga baahan yahay in ay si degdeg ah ula xiriiraan Booliska Buffalo wixii xadgudub galmo ah				•	•
--	--	--	--	---	---

#31. XADGUDUB KU SALAYSAN GALMADA

● Dhibaatayn galmo (tusaale, galmo aan qofka kale jeclayn, codsiyo rabitaan galmo, af ah, qoraal ah ama dhaqan jirka lagu muujiyo galmo ahaan)		•	•	•	•
● Galmo jirka ah ama ansha xumo galmo (sida soo bandhigid jireed oo anshax xumo ah, ku lug yeelasho galmo wim (Fasalada Pre-K ilaa fasalka 4-aad)	•	•	•	•	•
● Sexual activity or sexual misconduct (gr 5 to 12)		•	•	•	•

#32. DAAHITAANKA

● Daahitaan joogta ah ama xad dhaaf ah ee fasalka ama dugsiga	•	•			
---	---	---	--	--	--

#33. KU XADGUDUBKA ISTICMAALKA LA OGOLYAHAY EE TEKNOLOJIYADA

● Tixraac bogga 9-aad faahfaahinta heerarkan	•	•			
--	---	---	--	--	--

#34. HANJABAAD KA DHAN AH SHAQAALAHA DUGSIGA (Tilmaan jired ah, Hanjabaad Qoraal ah ama Hanjabaad Af ah)

● Fasalada Pre-K ilaa fasalka 4-aad	•	•	•	•	•
● Fasalada 5-aad ilaa 12-aad		•	•	•	•

DABEECADAHA AAN HABBOONAYN IYO QALQAL GELINTA IYO HEERARKA JAWAAB CELINTA

KEY: USE LOWEST LEVEL INDICATED FIRST

Heerka 1. Taageerada Fasalka iyo Kooxda Taageerada Ardayga: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka ardaygu aanu lahayn shilal hore iyo faragelin waxqabad aan loo meel dhigin	Heerka 2. Maamulka Haboon: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka taageerooyinka loo meel dhigo fasalka si wax looga qabto hab-dhaqanka, laakiin hab-dhaqanku uu sii socdo oo si xun u saameeyo waxbarashada ardayda iyo dadka kale	Heerka 3. Ka joojinta Muddada Gaaban: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka wax-ka-qabashada iyo taageerada meel loo dhigo laakiin hab-dhaqanka soo noqnoqda oo kor u sii socdo	Heerka 4. Codsiga Joojinta Muddada Dheer: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka dhaqanka ardaygu si dhab ah u saameeyo badbaadada dadka kale ee dugsiga
--	--	---	---

DABEECAD AAN HABBOONAYN OO QALQAL LEH	HEERKA 1	HEERKA 2	HEERKA 3	HEERKA 4	WAXA LAGA YAABAA IN LOO GUDBIYO BILAYSKA/HAY'ADDA KU HABBOON
--	-----------------	-----------------	-----------------	-----------------	---

#35. XATOOYO

• In ka yar \$500		•	•		
• Wixii ka badan \$500 (waxaa lagu talinayaa inaan booliska lala xiriirin ardayda dhigata Fasalka (Pre-K ama Kindergarten)			•	•	•

#36. HAYSASHADA TUBAAKADA AMA ISTICMAALKEEDA

• Shaqaalaha dugsiga waxa laga codsanayaa inay ardayda u gudbiyaan la-talinta ku haboon ee ku xadgudubka mukhaadaraadka	•	•			
---	---	---	--	--	--

#37. KU XAD-GUDUB HANTI DHULEED AMAR LA'AAN

• Joogitaanka hantida dugsiga ogolaansho la'aan, oo ay ku jiraan marka ardayga laga joojiyo ama laga saaro; waxaa ka mid ah jabsashada iyo gelitaanka		•	•	•	•
---	--	---	---	---	---

#38. IIBINTA IYO QAYBINTA AAN LA OGGOLAYN (sida iibinta iyo qaybinta aan la ogolayn ama aan la fasaxin alaabada oo aan si kale ugu mid ahayn xeerkan)

• Alaabo qiima lacageed oo yar (ka yar \$50)	•	•			
• Alaabo qiima lacageed muhiim ah leh		•	•		

#39. Hanjabaad Af ama Jireed ee Ardayga loo gaysto

• Luuqad hanjabaad ah ama dagaal tilmaamo jirka lagu muujiyo loola jeedo arday kale	•	•	•		
---	---	---	---	--	--

DABEECADAHA AAN HABBOONAYN IYO QALQAL GELINTA IYO HEERARKA JAWAAB CELINTA

KEY: USE LOWEST LEVEL INDICATED FIRST

Heerka 1. Taageerada Fasalka iyo Kooxda Taageerada Ardayga: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka ardaygu aanu lahayn shilal hore iyo faragelin waxqabad aan loo meel dhigin	Heerka 2. Maamulka Haboon: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka taageerooyinka loo meel dhigo fasalka si wax looga qabto hab-dhaqanka, laakiin hab-dhaqanku uu sii socdo oo si xun u saameeyo waxbarashada ardayda iyo dadka kale	Heerka 3. Ka joojinta Muddada Gaaban: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka wax-ka-qabashada iyo taageerada meel loo dhigo laakiin hab-dhaqanka soo noqnoqda oo kor u sii socdo	Heerka 4. Codsiga Joojinta Muddada Dheer: Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka dhaqanka ardaygu si dhab ah u saameeyo badbaadada dadka kale ee dugsiga
--	--	---	---

DABEECAD AAN HABBOONAYN OO QALQAL LEH	HEERKA 1	HEERKA 2	HEERKA 3	HEERKA 4	WAXA LAGA YAABAA IN LOO GUDBIYO BILAYSKA/HAY'ADDA KU HABBOON
--	--------------------	--------------------	--------------------	--------------------	---

#40. Hubka, Qoryaha iyo Walxaha Qarxa

<ul style="list-style-type: none"> ● Walxaha qarxa (haysashada, iibinta, qaybinta, qarxinta, ama hanjabaada qarxinta wax kasta oo hurin kara ama walxaha qarxa oo ay ku jiraan baaruudda rashka, bambooyinka qiiqa, lolka bullerka ama walxaha gubta ama walxaha qarxa ama walxo ama walxo isku jira, aan ahayn hub) 			●	●	● WAA IN loo gudbiyaa Booliiska
<ul style="list-style-type: none"> ● Hubka (haysashada hubka sida lagu qeexay 18 USC 921 ee xeerka federaalka – sida, qoryaha gacanta, qoryaha, qoryaha darandooriga u dhaca, iyo bambooyinka) 				●	● WAA IN loo gudbiyaa Booliiska
<ul style="list-style-type: none"> ● Qoryaha kale (haysashada qori kasta, noocay doontaba ha ahaatee, rasaas ku jirta ama aan rasaas lahayn, qori shaqayn karo ama aan shaqaynayn, oo ay ku jiraan shay kasta oo shabaha qoriga, aan ka ahayn qoryaha fudud-sida, qoryaha aariyada, qoryaha tooyga ah, qoryaha biyaha ka dhaca, iwm.) 			●	●	●
<ul style="list-style-type: none"> ● Sababi kara dhaawac jireed, hub kale, ama qori kale). Eryidda wax aan ka yarayn hal sano waxa faraya sharciga gobolka ee ku xad-gudbida hubka, laakiin waxaa wax ka beddeli kara Dugsiyada Dadweynaha Buffalo ayadoo u eegayan xadba xaalada-kiiska 			●	●	● WAA IN loo gudbiyaa Booliiska
<ul style="list-style-type: none"> ● Walxaha qarxa (haysashada, iibinta, qaybinta, qarxinta, ama hanjabaada qarxinta wax kasta oo hurin kara ama walxaha qarxa oo ay ku jiraan barruuda rashka, bambooyinka qiiqa, lolka bulerka ama walxaha gubta ama walxaha qarxa ama walxo isku jira, aan ahayn qori) 			●	●	● WAA IN loo gudbiyaa Booliiska

Haddii arday ama daryeel-bixiye u baahan yahay kaalmo ama adeegyo ka baxsan dugsiga, xafiisyada soo socda ayaa laga yaabaa inay ku caawiyaan:

Fadlan wac dugsiga ilmahaaga si aad u habayso tilmaamo kale

District Alternate Instruction (General Questions)	816-3133
Attendance Supports	816-3593
Guidance and Counseling	816-3702
Medical Leave Home Instruction	816-3133
Home Schooling Office	816-3106
Homeless Education Program	816-3717
Neglected and Delinquent At-Risk Youth Program	816-3172
Pupil Personnel/Suspension Hearings	816-3547
Student Placement/Registration	816-3717
Buffalo Public Schools Switchboard Operator	816-3500
Multilingual Education	816-3577
Office of Parent Advocacy	816-4678
Office of Parent and Family Engagement	816-3170
Security	816-3707
Special Education (Including: Pre-School, Student Placement & Parent Services)	816-3060
Superintendent's Office	816-3575

****Haddii ubadkaagu ka qaybqaadanayo barasho kale oo dugsiga dhexdiisa ahayn, waa inaad wacdaa dugsigooda wixii hawlhooda dugsiga ah****

2022-2023

Xubnaha Guddiga Waxbarashada

Mr. Louis Petrucci
President
Park District Member

Dr. Ann Rivera
Vice President of Executive Affairs
Board Member-at-Large

Dr. Kathy Evans-Brown
Vice President Student Achievement
East District Member

Mr. Terrance Heard
Chairman of Educational Support
Board Member-at-Large

Mrs. Paulette Woods
Chairperson of Finance and Operations
Central District Member

2022-2023

Xubnaha Guddiga Waxbarashada

Mrs. Sharon Belton-Cottman
Ferry District Member

Ms. Hope Jay
North District Board Member

Ms. Jennifer Mecozzi
West District Board Member

Mr. Lawrence Scott
Board Member-at-Large

Miss Jasmine Cameron
Student Board Member/
Student Representative

Dugsiyada Dadweynaha Buffalo

Tonja M. Williams, Ed.D.
Superintendent of Buffalo Public Schools

Sharon E. Brown, Ed.D.
Assistant Superintendent of Student Support Services

Orniece Hill
Assistant Superintendent of Student Support Services

www.buffaloschools.org

Guddiga waxbarashadu kuma sameeyo takoor ku salaysan da'da, caqiido, naafanimada, heerka guurka, asalka qaran, jinsiyadda, midabka, jinsiga ama nooca galmo ee barnaamijyadeeda, adeegyada, iyo hawlaha.

Weydiimaha ku saabsan xeerka takoor la'aanta waxaa lagu hagaajin karaa Tami Hollie-McGee, Madaxa Ilaha Khayraadka Aadanaha, 720 Hall City, Buffalo, NY 14202 ama adoo wacaya 716-816-3500.



www.buffaloschools.org